# Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiiinta iyo Daryeeleyaasha.

## Hal ilme, labo luqadood, xiise laba laaban

### Miyay dhibaato leedahay in carruurtu ay labo luqadood isla waqti keliya bartaan?

- Carruurtu waxay badi si fudud u baran karaan labo ama saddex luqadood. Waqti ayay qaadataa si hagaag loogu barto luqad cusub
- Inta hore, carruurta ayaa luqadaha isku qasi kara. Tani waa caadi
- Sii wad isticmaalka luqadda gurigaaga. Buugaag ku akhriya luqaddaas oo ku wada hadla. Waxay tani iyaga ka caawisaa in ay luqadaha oo dhan si ka fiican u bartaam
- Mararka qaar, carruurta waxaa ku adag in ay hadlaan ama wax fahmaan. Tani way dhici kartaa xataa haddii ay labo luqadood baranayaan
- Haddii ilmuhu uu dhib badan kala kulmo luqadda gurigooda, qof la hadal sida dugsiga xannaanada ilmahaaga ama la xiriir kooxda dabiibka hadalka iyo luqadda.

### Maxay muhiim u tahay in aad ilmahaaga kula hadasho luqaddaada gaarka ah?

- Luqadda guriga ee ilmaha ayaa aad muhiim u ah. Waxay taasi iyaga ka caawin kartaa in ay si ka fudud u bartaan luqadaha kale, sida af Ingiriisiga
- Waxaa ugu fiican in aad ilmahaaga kula hadasho luqaddaada gaarka ah. Adiga ayaa taas aad ugu fiican, oo dabiici ayay adiga kuu tahay. Isticmaalidda luqaddaada ayaa ilmahaaga ka caawinaysa in ay isku xiraan ama xiriir la yeeshaan qaraabada iyo dhaqanka
- Aqoonta in ka badan hal luqad ayaa waxtar badan u leh dugsiga iyo nolosha!

### Qodobbada muhiimka ah:

- Luqadda ugu fiican ee uu waalidka ama daryeeluhu kula hadli karo ilmahooda waa luqaddooda gaarka ah
- Carruurta intooda ugu badani waxay isla waqti keliya baran karaan labo ama saddex luqadood

- Waxaa muhiim ah in ilmahaagu uu barto luqadda gurigaaga.